

AMNIGA DABKA EE GURIGA



**FIRE
KILLS**

LET'S PREVENT IT

ROYAL BERKSHIRE
FIRE AND RESCUE SERVICE

Somali



Ma ogtahay...?


- Waxaad ku dhowdahay siddeed jeer in aad ku dhimato dab haddii aadan haysan alaarmiga qiiqa oo shaqeeya gurigaaga.
- Qiyaastii bar ka mid ah dababka guryaha ayaa sababo shilalka wax karinta.
- Labo dab ayaa maalintii waxaa bilaabo shumacyada.
- Lix maalmood ee walba qof ayaa u dhinto dabka uu sababo sigaarka.
- Qiyaastii saddex ka mid ah dabka kaca maalintii waxaa bilaaba kuleyliyayaasha.
- Koronto qaldan (qalabyada, fiilooyinka iyo sokodyada buuxsamay) ayaa sababo qiyaastii 4,000 dab ee ka dhaco guryaha wadanka oo dhan sannad walba.

PROTECT YOUR HOME WITH SMOKE ALARMS

KU ILLAALI
GURIGAAGA
ALAARMİYADA
QIIQA

Qaabka ugu sahlan ee looga illaaliyo gurigaaga iyo qoyskaaga dabka waa la shaqeynta alaarmiyada qiiqa.

Soo gado. Gasho guriga. Iska tijaabi. Waxay badbaadin karaan naf.



Xulashada alaarmigaaga qiiqa

- Geli ugu yaraan hal alaarmi qiiq ah qeyb walboo guriga ah.
- Fadlan la soco in laga yaabo in carruurta qaarkood aanay ku kicin qaylo-dhaanta qiiqa.
- Alaarmiga qiiqa waa raqiis waana fudud yahay in la rakibo.
- Waxa laga heli karaa dukaamada DIY, dukaamada qalabyada korontada iyo dukaamada waawayn ee wadooyinka.
- U fiirso mid ka mid ah calaamadahan, taasoo tusinaysa in alaarmiga la ansixiyay oo badbaado leeyahay.
- Qalabyada digniinta qiiqa ee batteriga xiran ee tobanka sano shaqeeya ku jirta ayaa ah xulashada ugu fiican. Xoogaa ayay qaalisan yihiin, laakiin waxaa kuu badbaadaysa kharashka beddelida baytariyada.
- Waxaa jira noocyo/moodhelo kala duwan oo la kala dooran karo. Adeegga dab-demiska iyo samatabbixinta deegaankaaga ayaa ku farxi doonaan inay ku siiyaan talo ku aadan midda kugu habboon.



British Standard Kitemark



LA SHAQEYNTA
ALAARMİYADA QIIQA
WAXAY BADBAADIN
KARTAA NAF

Talada ugu Sareysa



Geli alaarmiyada qiiqa

Sida loo hubiyo shaqeynta alaarmiyada qiiqa

Tijaabi alaarmiyada qiiqa ugu yaraan bil walba.

- Haddii kuwa ka mid ah alaarmiyada qiiqa ay leeyihiin batari hal sanno ah, iska hubi in la badelay sannad walba. Kaliya ka bixi batariga markii aad u baahantahayh inaad badesho.
- Marnaba ha damin ama haka bixin batariyada alaarmigaaga haddii uu ku damo si qalad ah.
- Batariga caadiga ah ee alaarmiyada shaqeeyo waa dooqa ugu raqiisan, laakin batariyada ayaa u baahan in la badelo sannad walba.
- Dad badan ayaa iloobo inay tijaabiyaan batariyada, haddiiba nolosha batariyada ay wanaagsanyihiin.
- Alaarmiga ku shaqeeya korontada waxaa uu dab ka helayaa korontada gurigaaga oo waxay leeyihiin batari kayd ah haddii ay dhacdo in korontadu go'do. Waxay u baahan yihiin in uu rakibo koronto yaqaan khibrad u leh, oo si la mid ah alaarmiga batteriga ku shaqeeya, waxay u baahan yihiin baaritaan/tijaabin.
- Tijaabinta alaarmiyada qiiqa waxay baartaa sensarka qiiqa sidoo kale sida saadka korontada iyo/ama batariga.
- Waxaad xittaa ku xiriirin kartaa alaarmiyada ku jiro, markaas markii hal alaarmi ogaado dab kuligood way wada dammaan. Kan waa waxtar haddii aad ku nooshahay guri weyn ama dhoor qeybab.





Iska tijaabi

Nalka Strobe iyo alaarmiyada sensarka gariirinta waxaa loo heli karaa kuwa dhagoolka ah ama ay ku adagtahay maqalka. La xiriir Tallaabada Qadka Warbixinta Maqalka Dhagoolka **0808 808 0123** ama fariinta taleefonka **0808 808 9000**.

Gelinta alaarmiyadaada qiiqa

Booska ugu haboon waa saqafka, waa bartamaha qolka, iyo wadada hoolka iyo dagitaanka, markaas waxaad ka maqli kartaa alaarmiga gurigaaga oo dhan.

- Ha gelin alaarmi gudaha ama meel u dhow jikooyinka ama qubeyska meeshaas oo qiiqa ama huurka ay ku dami karaan si lama fillaan ah.
- Haddii ay kugu adagtahay inaad gashatid alaarmiyada qiiqa nafsadaada kala xiriir dab daminta deegaankaaga iyo adeega badbaadinta wixii caawin ah. Way ku farxayaan inay kuu geliyaan.




Illaalinta alaarmiyadaada qiiqa


- Tijaabi alaarmiyadaada qiiqa ee qeyb ka ah jadwalka qoskaaga joogtada ah.
- Ku tijaabi adiga oo riixayo badhanka illaa alaarmiga ka dhawaaqo. Haddii uusan dhawaaqin, waxaad u baahantahay inaad bedeshid batariga.
- Nadiifi qaylo-dhaanta qiiqa lixdii biloodba mar si aad boodhka uga saarto.
- Haddii alaarmiga ku qeyliyo si joogto ah, waxaad u baahantahay inaad badeshid batariga islamarkiiba.
- Haddii uu yahay alaarmi toban sanno jiray, waxaad u baahanaysaa inaad badeshid alaarmiga oo dhan toban sanno ee walba.

Qalabka kale ee ah inaad tixgelisid


- Bustooyinka dabka ayaa loo adeegsadaa in lagu damiyo dabka ama lagu duubo qofka dharkiisa dab haysto. Waxaa wanaagsan in lagu hayo jikada.
- Qalabyada dab deminta waxay faa'iido yeelan karaan haddii dabku aad u yar yahay ama uu xannibayo meelaha laga baxayo. Haddii aad doorato inaad isticmaasho qalabka dab-deminta, had iyo jeer akhri tilmaamaha kahor intaadan isticmaalin oo aadan naftaada khatar gelin.
- Alaarmiyada kuleelka waxay ka ogaan karaan dabka jikada meeshaas oo alaarmiyada qiiqa ah inaan la gelin.



Iska tijaabi



Iska badel



Ku badel

HOW TO PREVENT COMMON FIRES

SIDA LOOGA HORTAGO DABABKA CAADIGA AH

Qeybtaan waxay kuu sheegeysaa sida aad uga fogaan kartid dabka gurigaaga, oo ay ku jiraan sida loogu kariyo si badqab ah ama loogu daryeelo korontooyinka, kululeeyayaasha, shumacyada iyo sigaarada.

GUDAHA JIKADA
KORONTADA
SIGAARADA
SHUMACYADA

Oo jikada ah

U kari si badqab ah

Si dheeraad ah uga taxadar haddii aad u baahantahay inaad ka tagtid jikada adiga oo wax karinayo, ka qaad digsiyada kuleelka ama hoos u gaabi si aad uga fogaatid qatarta.


- Ka fogow karinta markii aad alkulo cabsantahay.
- Ka fogow uga tagida carruurta jikada kaligood markii aad ku karineysid burjikada. Ku haay taraqyada iyo qabsiga digsiiga meel aan la gaari karin si badbaado loogu hayo.
- Iska hubi in qabsiyada digsiiga maraqa aysan ku dhagin – si markaas aysan istoofka u damin.

- Ka taxadar haddii aad xirantahay dhar dabacsan – si fudud ayay u qabsan karaan dabka.
- Ku hay shukumaanada shaaha iyo dharka meel ka baxsan kariyaha iyo burjikada.
- Qalabyada dhimbisha wuxuu ka badqab yahay taraqa ama laytarka si loogu shido kariyaha gaaska, sababtoo ah ma lahan holac cad.
- Hubi kariyaha inuu dansanyahay markii aad dhameysatid karinta.

Ka taxadar korontooyinka

- Ku hay madaxyada korontada (fiilooyinka iyo qalabyada) meel ka baxsan biyaha.
- Wax bir ah ha gelinin kululeeyaha.

Talada ugu Sareysa



Ku haay meel aan la gaari karin

- Hubi in qalabyada lagu dubo rootiga ay nadiif yihiin lagana fogeeyay daahyada iyo duubabka jikada. Badiya qalabyada lagu dubo rootiga waxay leeyihiin jilbis ka saara jajabka si uu kaaga caawiyo inaad nadiifiso.
- Ku haay foornada, burjikada iyo dubaha si nadiif ah oo qaab fiican u shaqeynayo. Dufanta ku aruurtay iyo garaasada ayaa kicin karo dab.

Dufan shiilida qotoda dheer


- Iska taxadar markii aad ku karineysid saliid kulul – si fudud ayay u iftiimisaa.
- Hubi in cuntada ay qalalantahay ka hor intaadan gelin saliida kulul si markaas aysan u firdhismin.
- Haddii saliida ay bilawdo inay qiiqdo – aad ayay u kulushahay. Dami kuleelka iyo u dhaaf inuu qaboobo.

- Isticmaal qalabka xakameeyaha shiilaha korontada. Aad uma kululaan karaan.

Waxa la sameeyo haddii digsiiga uu qabsado dab

- Ha isku dayin wax qatar ah. Dami kuleelka haddii ay badqab tahay in la sameeyo sidaas. Marnaba haku tuurin biyo dusheeda.
- Hala tacaalin dabka nafsadaada.

**DIBADA U BAX
DIBADA
JOOG
OO SOO WAC
999**



Korontooyinka

Sida looga fogaado dabka korontada

- Marwalba hubi inaad adeegsatid fiyuuska saxda ah ee looga horgato kuleelka xad dhaafka ah.
- Hubi in qalabka korontada uu leeyahay aastaanta badqabka British ama Yurubiyaanka markii aad iibsaneysid.
- Qalabyada qaar, sida mashiinada dhaqida, waa inay yeeshaan hal balaag iyaga u gaar ah, maadaama ay aad u awood leeyihiin.
- Isku day oo ku hay hal balaag sokedkiiba.
- Markii aad jaajareyneysid alaabaha korontada, raac tilmaamaha soo saaraha oo raadi aastaanta CE ee tilmaanta jaajarada u hogaansan heerarka badqabka Yurubiyaanka.

Ku hay qalabyada korontada nadiifsanaa iyo qaab si fiican u shaqeynayo si looga hortago inay kiciyaan dab.





Fiilo dheeraad ah ama adhabtarka ayaa yeelanayo xadeyn xadidan ee sida inta qeybaha korontada ay qaadan karto, marka ka taxadar inaad buux dhaafin iyaga si aad u yareysid qatarta dabka.

Qalabyo ayaa isticmaalo cadad kala duwan ee awood ah – telefishanka ayaa adeegsan karo 3 qeyb balaaga ah iyo nadiifiyaha fakuumka ah 5 balaag qeyb ah tusaale ahaan.

Ogow xadeynta!

$$5 + 5 + 3 = 13$$

AMP AMP AMP AMP



- Ku haay indhahaaga inay u jeedaan aastaamaha halista ama fiilada dabacsan sida aastaamaha gubashada, balaagyada iyo sokedka kulul, fiyuusyada qarxa ama qalabka difaaca maasada ee u qabsadaa sabab cad la'aan, ama nalalka biqleynayo.
- Fiiri oo badel fiilooyin walboo hore iyo madaxyada fiilada, gaar ahaan haddii ay ka qarsoonyihiin aragtida – ee gadaasha alaabaha guriga ama rooga ama darinta hoosteeda.
- Ka bixinta qalabyada ayaa ka caawiso yareynta qatarta dabka.
- Qalabyada ka saar korontada marka aanad isticmaalayn, marka ay si buuxda u jaajareysmaan, ama marka aad seexanayso.

Alaabta guriga


- Marwalba hubi in alaabtaada guriga leedahay calaamada joogtada ah ee dadba u dulqaato.

Kululeelayaasha la qaadi karo

- Isku day inaad ku dhajisid kululeeyayaasha darbiga ka soo horjeedo si aad uga hortagtid inay dhacaan.
- Ku haay meel ka banaan daahyada iyo alaabaha guriga oo marnaba ha u adeegsan dharka qalajinta.

Isticmaalka bustaha korontada

- U keydi bustaha korontada si simman, duuban ama si dabacsan u duuban si looga hortago waxyeelada fillada gudaha ah.
- Kala bixi bustayaasha ka hor inta aadan aadin sariirta, illaamaa uu ka leeyahay xakameeyaha cabiraha iyo xakameynta badqabka isticmaalka habeenkii.
- Isku day inaad iibsan bustayaasha hudheyda ah oo si joogta ah uga fiiri dhammaanshaha iyo jeexnaanta.
- Marwalba raac tilmaamaha soo saaraha.



Sigaarka

Sigaarka si ku haboon u dami oo u tuur si taxadar ah. Dami iyaga. Markaas dami!

- Weligaa haku cabin sigaar sariirta.
- Banaanka ku cab sigaarka oo sigaarka bannaanka ku soo demi - tani waxay ka badbaado badan tahay sigaarka oo lagu cabo gudaha guriga.
- Isticmaal weelka lagu demiyo hashiishka/sigaarka - waligaa ha isticmaalin dambiisha qashinka.
- Xaqiiji in weelka lagu dambiyo hashka/sigaarka aanu rogmi karin oo uu ka samaysan yahay shay aan guban doonin.
- Weligaa ha ka tagin sigaar shidan, sigaarka ama tuubo meel taala. Si fudud ayay u rogmi karaan oo ay dab u kicin karaan.
- TSida ugu wanaagsan ee lagu dhimi karo khatarta waa in la isku dayo in la joojiyo, adigoo isticmaalaya taageerada NHS haddii aad u baahan tahay. Haddii aadan rabin inaad joojiso, ka fiirso vaping.
- Ka taxadar haddii aad sigaar cabto marka aad daalan tahay, qaadashada daawooyinka lagu qoray, ama haddii aad wax cabtay. Waxaa laga yaabaa inaad seexato oo aad sariirtaada ama fadhigaaga dab qabadsiiiso.
- Ka saar sigaarka elektaroonigga ah marka si buuxda loo dallaco oo hubi inaad isticmaalayso dabaysha saxda ah.
- Weligaa ha cabbin sigaar sharci-darro ah.

Talada ugu Sareyso



Dami iyaga. Markaas dami!

Shumacyada

Hubi in shumacyada ay ku illaalsanyihiin qabte ku haboon oo kabaxdsan alaabaha laga yaabo inuu qabsado dabka – sida daahyada.

- Dami shumaca markii aad ka tageysid qolka, oo hubi inay dansanyihiin gabi ahaanba habeenkii.
- Carruurta waa inaan kaligood looga tagin shumac daaran.
- Tixgeli isticmaalka LED ama shumacyada baytari ku shaqeeya.
- Ka fogey xayawaanada shumac daaran.

- Kabriidka iyo dab- shidaha ka ilaali meel aanay carruurta gaadhin.
- Kaliya iibso dab- shideyaasha iyo sanaadiiqda kabriidka ee u adkaysta ilmaha.

Bokisyada taraqa ayaa hadeer wato qoraalkaan digniinta ah.



**Qatar!
Dabka wuu dillaa carruurta**

Talada ugu Sareyso



Ka taxadar shumacyada



QORSHEY

BAXSI


BADQAB AH

Gelinta alaarmiyada qiiqa waa tallaabada ugu muhiimsan ee looga illaalinayo nafsadaada dabka. Laakin maxaad sameyn laheyd haddii mid uu damo inta lagu jiro habeenka?

Qaybtani waxay kaa caawin doontaa inaad samayso qorshe ku aadan xaalad degdeg ah.

- Qorshey dhabo baxsi ah oo hubi in qof walba garanayo sida looga baxsado.
- Hubi ka bixitaanada inay banaanyihiin.
- Dhabaha ugu wanaagsan waa wadada caadiga ah ee laga galo lagana soo baxo gurigigaaga.
- Ka fakar wado labaad haddii midka koowaad uu xirmo.
- Ku qaado dhoor daqiiqo aad ugu tababaratiid qorshaha baxsigaaga.
- Dib u eeg qorshahaaga haddii fadhiga gurigaaga isbadelo.

Ku haay furayaasha albaabka iyo daaqada meel qof walbaa uu ka heli karo.



Qorshey wadada baxsiga

Waxa la sameeyo haddii uu dab jiro

Hala tacaalin dabka shaqsiigaaga. U dhaaf xirfadlayaasha.

- Is daji oo durbadiiba ka falceli, u saar qof walba dibada sida ugu dhaqsiha badan ee suurtoogalka ah.
- Ha lumin waqti lagu baarayo waxa dhacay ama badbaadinta waxyaabaha muhiimka ah.
- Haddii uu jiro qiiq, ku haay hoos meesha hawada ka banaantahay.
- Ka hor inta aadan furin albaabka fiiri inay diirantahay. Haddii ay diirantahay, ha furin – dab ayaa dhinaca kale ka jiro.

- U soo wac 999 sida ugu dhaqsiha badan ee aad ka baxdid dhismaha. Wacitaanada 999 waa bilaash.




Dibada u bax, dibada joog oo soo wac 999

Waxa la sameeyo haddii baxsigaaga uu xirmo

Haddii aadan dibada u bixi karin, isugu gey qof walba hal qol, sida ku haboon oo leh hal daaqad iyo taleefon.

- Dhig go'yada agagaarka hoose ee albaabka si aad uga celisid inuu qiiq ka soo baxo.
- Soo wac 999 kadib fur daaqada oo kuu qeyli "I CAAWI DAB".
- Haddii aad dabaqa hoose joogtid ama dabaqa koowaad, waxaa kuu suurtoogeli karto inaad ka baxsid daaqada.
- U isticmaal go'yada inaad ugu celisid dhacitaankaaga oo aad si taxadar ah naftaada hoos ugu dajiso. Ha boodin.

- Haddii aadan furi karin daaqada ka jabi dhalada geeska hoose. Samey geeso aan sineyn oo badqab ku ah shukumaan ama busto.



Waxa la sameeyo haddii dharkaaga dab qabsado


- Haku ordin agagaarka, waad ka sii darsiineysaa holacyada.
- Hoos seexo oo dhulka isku wareeji. Way ku adkeysaa in dabka uu faafo.
- Ku dami dabka qalabyada adag, sida jaakad ama busto.
- Xasuuso, Joogso, Istuur oo Is Galangalo!



JOOGSO!



ISTUUR!



GALANGALO!

Sida looga baxsado dhismaha heerka sare

- Xaqiiji in adiga, iyo qof kasta oo gurigaaga jooga, aad taqaanaan qorshaha dabka ee dhismahaaga iyo halka ay yaaliin alaarmiga dabka iyo meelaha laga baxo haddii uu dab kaco. Si la mid ah dhismayaasha oo dhan, waa inaad qorsheysaa oo aad ku tababartaan waddo aad uga baxsataan.
- Ka fogow isticmaalka wiishashka iyo balkoonada haddii uu dab jiro.
- Way sahlantahay in lagu jahwareero qiiqa, marka xisaabi inta albaabo aad u baahantahay inaad martid si aad u gaartid jaranjarada.
- Iska hubi in wadada aad ku baxsanaysaan uu yahay mid aan waxba yaalin iyo inaysan jirin wax dariiqyada ama jaranjaroooyinka yaala oo dab qabsan kara - sida sanduuqyada ama qashinka.
- Hubi wadooyinka aado jaranjaroooyinka inaysan xirneyn.
- Waa inaad weli heshaa alaarmiyada qiiqa ee gurigaaga gaarka ah, xittaa haddii ay ka jiraan nidaam digniin xaafada ah.



SAMEE HUBIN WAQTIGA JIIFKA

Waxaad wax badan halis ugu jirtaa dab markii aad jiiftid. Marka waa fikrad wanaagsan in la hubiyo gurigaaga ka hor inta aadan seexan.

Liiska warbixinta

Xir albaabada gudaha habeenkii si aad uga joojisid dabka inuu faafo.

☐

Dami oo ka saar qalabyada korontada illaa maa loo naqshadeeyay in looga tago – sida qaboojiyahaaga.

☐

Hubi in kariyahaaga dansanyahay.

☐

Haka shaqeysiinin qalabyada sida mashiinnada dharka lagu dhaqo, qalajiyaasha iyo weel-dhaqashada xilliga habeenkii.

☐

Dami kululeeyayaasha oo geli difaacaha korontada.

☐

Ka foguee shumacyada iyo sigaarada dhismaha.

☐


Hubi ka bixitaanada inay banaanyihiin.


☐

Ku haay furayaasha albaabka iyo daaqada meel qof walbaa uu ka heli karo.

☐


Xir albaabada gudaha habeenkii





ALAARMİYADA QIIQA

WAXAY BADBAADISAA NOLOL

Haddii uu dab kako, bannaanka u bax,
bannaanka joog oo wac 999.

Si aad u hesho talo gaar ah oo ku
aadan adiga iyo gurigaaga, booqo
www.ohfsc.co.uk oo buuxi jeegareynta
badbaadada dabka ee guriga.

FS069_SO © Xuquuqda daabacaadda Crown 2022.
Waxaa daabacay Xafiiska Arrimaha Gudaha.
Juun 2022.
Nooca 4



ISBN 978-1409845973

